



SHAQADA WADANKA MARAYKANKA

Shaqadu wadankaan Maraykanka waa mid aad muhiim u ah. Raadinta, helista, iyo ilaalsashada shaqada waxay muhiim utahay mustaqbalka iyo fayadhawrka qoyskaaga. Waa qaabka ugu dhaqsaha badan ee aad iskukaafin karto waxayna muhiim utahay guushaada. Wkaaladaada Dib udajinta ayaa kaacaawinaysa inaad kuxiranto adeegyada shaqaalaysiinta, laakiin ugu danbayn adaa qaadanaaya doorka ugu muhiimsan raadinta iyo ilaalinta shaqadaada. Waxaa lagu diyaarinayaa inaad si firfircoon uraadsato shaqo sida ugu dhakhsiyaha badan markaad soo gasho Maraykanka.

RAADINTA SHAQO

Dhamaan dadka waawayn, rag iyo dumar ba, kuwaasoo udhaxeeya da'da 18-64 kuwaasoo awood uleh inay shaqeeyaan waa inay muhiimad kadhigtaan raadinta shaqo. Shaqadu waxay kuu sahlaysaa inaad taageerto naftaada iyo qoyskaaga. Caawimaada dawlada waa mid kooban waqti iyo cadad ba, sidaas awgeed waa muhiim inaad shaqo raadsato isla marka aad Maraykanka soogasho.

Shaqadu maaha wax ay balan qaadayso dawlada Maraykanka ama Wakalada Dib udajintu. Waxay qaadani kartaa inaad shaqo hesho asbuucyo ama bilo waxaadna mari kartaa waraysiyo shaqo oo kala duwan. Waa inaad lashaqaysaa khabiirkaaga dhanka shaqada si aad uraadiso shaqo aadna barato qodobada guud ee waraysiyada. Waxaa lagaa rabaa inaad aqbasho shaqada ugu horaysa ee aad hesho, xataa hadaysan mushaar badan lahayn ama aysan ahayn meelaha aad taqaano, si markaas aad uyeelato taariikh shaqo aadna utaageerto qoyskaaga. Hadaadan qaadani shaqada lagu siiyo, waxaad waayi kartaa taageerada dawlada. Waxaa jira dad badan oo isla shaqada codsnaaya, sidaas awgeed waa muhiim inaad aqbasho heerka bilowga ah shaqo cusub. Si aad udhisto taariikh shaqo oo wanaagsan, waa inaad shaqada sii wadaa ugu yaraan 6 bilood.

SHAQADA



DHAQANKA SHAQO EE MARAYKANKA

Maraykanka waxaa lagu yaqanaa inuu yahay dhulka fursad ee dadka dadaalka leh. Si aad uhesho shaqo mushaar fiican, oo badan waxaad ubaahan tahay inaad uhadasho, akhrido, aadna qorto luuqada Ingiriisiga waxaadna ubaahan kartaa inaad barato xirfado cusub. Hadaad horay uga shaqaysay xirfad gaara markaad wadankaaga joogtay, waxaad ubaahan kartaa inaad casharo qaadata aadna hesho shahaado kahor intaadan shaqo xirfadaas ah kahelin Maraykanka.

Raga iyo dumarka labaduba way shaqeeyaan Maraykanka. Haweenku waa nus kamid ah dadka shaqeeya, waxayna sameeyaan isla shaqooyinka ragu sameeyo heerarka oo dhan, waxayna si joogtaa ukormeeraan shaqaalaha raga ah.

Marka Maraykanka lajoogo, caruurta jira da'da 14 iyo kuwa kasii wayn waxay kashaqayn karaan shaqooyinka haaf maalinta ah, waxaase koobnaan kara saacadahay shaqayn karaan iyo noocyada shaqo ee ay qaban karaan. Dad badan oo kamida dadka da'da yar ee Maraykanka waxay shaqeeyaan haaf maalintii kadib iskuulka, maalmaha fasaxa asbuuca, iyo xiliyada fasaxa caadiga ah. Dawladu Maraykanku waa inay difaacdaa dhalinta shaqaalaha ah.



XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA SHAQADA

Maraykanka, shaqaaluhu waxay leeyihiin xuquuq si lamida wajibaadka markay joogaan goobta shaqada. Waxaad xaq uleedahay in mushaar lagugu siiyo shaqadaada shuruucda shaqada ayaana kadifaacaaya shaqaalaha xaaladaha shaqo ee aan amaanka ahayn. Sidoo kale waa muhiim inaad bixiso canshuuraha Dawlada Maraykanka.

Qofka aad ushaqayso kuma takoori karo sabab laxariira qaxootinimadaada ama kuuma diidi karo shaqada ama abaalmarintaada sababao laxariira da'daada, naafonimadaada, xaaladada guur, isirkaaga ama wadankaad katimid, midabkaaga, diintaada, jinsigaaga, lab/dhigid nimaada, ama dareenkaaga galmo. Hase yeeshee, shaqooyinka

Cultural Orientation Resource Exchange

8719 Colesville Road, 3rd Floor • Silver Spring, MD 20910

For more information, visit the CORE Resettlement Navigator website at corenav.org.



The contents of this fact sheet were developed under an agreement financed by the Bureau of Population, Refugees, and Migration, United States Department of State, but do not necessarily represent the policy of that agency and should not assume endorsement by the Federal Government. **This material is in the public domain and may be reproduced.**

qaar, gaar ahaana dawlada, waxaa kaliya loo ogolyahay muwaadiniinta Maraykanka.

Shaqaaluhu waxay xaq uleeyihiin inay kashaqeeyaan meel kahufan midab takoor iyo dhibaatayn.

Dhiibataynta galmo waa dhaqan kasta oo galmo kaasoo kadhiga qofka inuu dareemo in lagu cadaadiyay ama uusan kuqanacsanayn lamana ogola goobta shaqo.



SUAALAHA INTA BADAN LA ISWAYDIYO

MA LA IGAA CAAWINAYAA RAADINTA SHAQO?

Wakaaladaada shaqada ayaa kugu xiraysa adeegyada shaqada meelkasta oo aad dagan tahay, laakiinadaa leh doorka ugu wayn ee raadinta iyo ilaalinta shaqadaada. Inaad shaqo raadiso waa muhiim dalkaan Maraykanka, shaqadaada koobaadna manoqonayso mid lamid ah ama isku nooc ay yihiin shaqadii wadankaaga. Waxay noqon kartaa heer bilow ah, shaqo lasiiyo dadka aan khibrada lahayn, waxayna sidoo kale noqon kartaa mid kumeelgaar ah ama haaf ah. Maadaama qiimaha nolasha ay aad usarayso Maraykanka, sida caadiga ah, raga iyo dumarkuba waa inay shaqeeyaan.




PHOTO | JOHN LOK/IRC

SIDEE AYAAN KUTAGAYAA SHAQADAYDA?

Gadiidka dadwaynha ayaa laga helaa inta badan magaalooyinka wadanka Maraykanka. Gaariyaal mabxiso wakaalada dib udajintu. Sidaas awgeed, waxay ubadan tahay inaad raacdo gaadiidka dadwaynaha si aad ugaarto shaqadaada koobaad.